



Summad: WC/XW/00.588/04/20

Tr. 21/04/2020

Baaq **Cambaareyn Fal-dembiyeedyada Kufsiga**

Wasaaradda Cadaaladda Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS), iyadoo cambaareynaysa tallaabooyinka foosha xun ee la xiriira Kufsiga maalmahan danbe kusoo batay dalka oo marka fiir gaar ah loo yeesho ay kasoo baxayso in fal-dembiyeedkaas Bulshada Soomaaliyeed uu ku hayo dhib iyo argagax aan loo dul-qaadan Karin, waxay Wasaaradda Cadaaladda halkan kusoo gudbineysaa baaq cambaareyn adag ah oo ku aaddan “fal-dembiyeedka kufsiga”, ciqaabta ay tahay in ay muteysato ciddii ku kacda fal-dembiyeedkaas, aragtida caalamiga ah ee ku aaddan fal-dembiyeedkaas iyo baaq ku aaddan hay’addaha Dawladda ee mas’uulka ka ah wax-ka-qabadka fal-dembiyeedyada noocaas ah.

Waxaan marna shaki ku jirin in “fal-dembiyeedka kufsiga” uu yahay dembi culus oo aan marna la oggoleyn in la sameeyo nooc kasta oo uu yahayba, cid kasta oo ku kacda fal-dembiyeedka kufsiga ah oo uu ku caddaato waxay muteysaneysaa “Ciqaab Culus” oo ay si wada jira u saareen Shareecada Islaamka iyo Xeerarka kale ee dhaqan-galka ka ah dalkeena Soomaaliya. Waxaana sharci ahaan mamnuuc ah cid kasta oo ku kacda fal-dembiyeedkaas in loo shafeeco qaado ama loo sameeyo meer-meerin iyo hiilo dhaawac u geysan karta cidda dhibanaha ah sidoo kalena sababi karta in uu ka fakato Ciqaabta ay saareen Shareecada Islaamka iyo Xeerarka dalka.

Haddaba, iyadoo la tixraacayo Qodobka 3^{aad} ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee JFS, Shareecada Islaamka waxay si shaki la’aan ah u mamnuucday ku kicidda fal-dembiyeedka kufsiga iyo guud ahaan “Galmada Sharci-darrada ah” waxayna arrintaas ku caddahay Aayadaha Quraanka iyo Xadiith-ta Nabigeena (Naxariis iyo Nabad-gelyo Kor-kiisa ha ahaatee). Waxayna Shareecada Islaamku saarta cid kasta oo ku kacda fal-

HQ: MARTINE HOSPITAL ROAD, HAMAR-WEYNE DISTRICT, MOGADISHU

P. O. Box: 629, Hotline No. +2521 - 865880, E-mail: info@moj.gov.so or info@mojc.gov.so



dembiyeedka kufsiga ama Galmo kasta oo sharci darro ah “Ciqaab Culus” sida ku cad Aayadaha Quraanka iyo Axaadiith-ta Nabigeena Suuban (NNK).

Dhinaca kale marka la tixraaco Qodobbada (398, 399, 400 & 401) ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed waxay si faahfaahsan u tilmaamayaan mamnuucidda kufsiga ama Galmada Sharci-darrada ah iyo sidoo kale “Ciqaabta Culus” ee la saaray cid kasta oo ku kacda fal-dembiyeedka kufsiga ama Galmada Sharci-darada ah, waxayna qodobbadaas aad u caddeynayaan noocyada kala duwan ee uu leeyahay fal-dembiyeedkaas iyo ciqaabta ka dhalaneysa nooc kasta oo lagu kaco marka lagu caddeeyo cidda gashay.

Waxaa sidoo kale xusid mudan, in fal-dembiyeedka kufsigu yahay mid guud ahaan caalamku ka siman yahay mamnuuciddiisa iyo marinta ciqaab culus cid kasta oo ku kacda fal-dembiyeedkaas, iyadoo dhammaan dawladaha aduunku ka mideysan yihiin arrintaas, sidoo kale shuruucda caalamiga ah ay si isku mid ah meel uga taagan tahay mamnuucidda falka noocaas ah ee foosha xun.

Iyadoo la tixgalinayo Nusuusta Shareecada Islaamka, Qodobbada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed sida sare aan kusoo xusnay iyo Sharciyada kale ee sida cad u mamnuucaya Kufsiga noocyadiisa kala duwan iyo sidoo kale “Ciqaabta Culus” ee ka dhalaneysa sameynta fal-dembiyeedkaas, Wasaaradda Cadaaladda Xukuumadda JFS waxay faraysaa dhammaan Hay’adaha ka mas’uulka ah fulinta sharciga in tallaabada sharci ee ay mudan yihiin laga qaado dadka ku kaca fal-dembiyeedka kufsiga, waxayna Wasaaraddu caddeynaysaa in aan sinaba loogu dul-qaadan Karin dhacdooyinka maalmahan danbe aadka ugu soo batay dalka ee la xiriira kufsiga, gaar ahaan midka loo geysto Gabdhaha yaryarka ah ee damiir ahaan iyo damac ahaanba aysan suuro-galka ahayn in lagula kaco fal-dembiyeedka noocaas oo kale ah.

Wasaaradda Cadaaladda Xukuumadda JFS, waxay si gaar ah ugu baaqeysaa Hay’adda Baarista Dembiyada (CID), Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka, Xeer-ilaalinta Ciidamada Qalabka-sida iyo cid kasta oo ka mas’uul ah soo-qabashada iyo dacwad ku-oogista dhammaan dadka lagu tuhunsan yahay in ay ka dambeeyeen falalka Kufsiga foosha xun oo maalmahan danbe dhacay in sida ugu dhaqsaha badan sharciga loo horgeeyo dadkaas, iyadoo la marsiinayo hab-raaca dacwo oogista ee

HQ: MARTINE HOSPITAL ROAD, HAMAR-WEYNE DISTRICT, MOGADISHU

P. O. Box: 629, Hotline No. +2521 - 865880, E-mail: info@moj.gov.so or info@mojc.gov.so



sharciyada dalka ku cad. Dhinaca kale waxay Wasaaraddu ka codsanaysaa Garsooreyaasha Maxkamadaha dalka in ay tallaabada sharci ee ku habboon marsiiyaan dadka ay ku caddaato in ay fal-dembiyeedkaas ka qeybqaateen ama ku lug lahaayeen.

Ugu danbeyntii, si loo fududeeyo shaqada Hay'adaha Dembi Baarista iyo Maxkamadaha dalka, Wasaaradda Cadaaladdu waxay codsanaysaa in la helo "Sheybaar" laga sameeyo Magaalo Madaxda Dalka ee Muqdisho oo lagu baaro (DNA-da) dadka lagu eedeeyo dembiyada kufsiga iyo kuwa kale ee arrimaha culculus la xiriira, waxayna Wasaaraddu ka codsanaysaa cid kasta oo gacan ka geysan karta helitaanka Sheybaarkaas in ay suura-galiso keenistiisa.

Ilaalinta Sareynta Sharciga Dalka waa waajib saaran muwaadiniinta Soomaaliyeed Shacab iyo Dawladba.

Wabillaahi Towfiiq

**Wasaaradda Cadaaladda
Xukuumadda JFS;**

